



Fikrad dhiibasho ku saabsan soo jeedinta qorshaha dugsiga dhexe ayaa iska soo daba dhacaya.

Boqolaal ka tirsan waalidiinta iyo xubnaha bulshada ka tirsan ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa ka qayb qaataj kulamo dadweyne oo looga talagalay isku keenida fikradaha ku saabsan soo jeedinta qorshaha furitaanka laba dugsi dhexe oo cusub ee Harriet Tubman iyo Roseway Heights.

Ilaa iyo hada, Guddiga PPS waxay qabatay laba kulan oo dhageysi oo ku saabsanaa soo jeedinta qorshaha, mid ka dhacay Dugsiga Sare ee Madison iyo mid ka dhacay qolka guddiga ee xafiiska dhexe. Intaasi waxaa dheer, in shaqaalaha degmadu ay qabteen laba kulan oo bulsho, mid ka dhacay Madison iyo mid ka dhacay Sabin K-8.

Soo jeedinta qorshaha, oo ay ka mid yihiin tiro isbedelada xuduuda ah, ayaa sababay in la helo jawaab fara badan, oo ay ka mid yihiin in ka badan 200 fikradood internet-ka laga dhiibtay, tiro badan oo email ah iyo dhowr saacadadood oo la hadlay iyada oo goobta la joogo.

Sida uu dhigayso soo jeedinta qorshaha hada jira, dugsiyada Boise-Eliot/Humboldt, Irvington, Martin Luther King Jr. iyo Sabin K-8 waxay isku bedeli lahaayeen dugsiyo ah K-5. Ardayda dhigata dugsiyadaasi waxay aadi lahaayeen Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman. Dugsiyada Lee, Scott iyo Vestal K-8 schools waxay isku bedeli lahaayeen K-5, iyada oo ardaydaasi ay aadi lahaayeen Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights. Intaasi waxaa dheer, Rose City Park waxaa la furi lahaa isaga oo ah dugsiga xaafada ee K-5.

Guddiga waxaa la rajeynayaa in ay arrinka bilaabaan kulanka shaqo ee la leeyahay Oktoobar 16, iyada oo ay dhici karto in Oktoobar 24 cod bixin loo qaado qaababka meelaha looga kala imaanayo dugsiga dhexe.